



QORSHE DHULEED/QARIIRADEED LA XAQIIJIYEEY (CERTIFIED PLOT PLAN)

WAA MAXAY QORSHE DHULEED/QARIIRADEED LA XAQIIJIYEEY?

Qorshe dhuleed/qariiradeed la aqiijiyeey waa sawir shaabadaysan, oo la sameeyay iyadoo la isticmaalayo cabiraad sax ah oo uu sameeyay injineer ka diiwaangashan gobolka ama sahmiye dhuleed gobolka ka diiwaangashan. Waxay muujinaysaa booska, xariiqyada soohdintiisa, wadarta cabirka booska labajibbaaran ee feet waxayna soo bandhigaysaa dhammaan dhismayaashii hore ee boosk sida:

1. Guriyeynta;
2. Decks (Barandooyinka Guriga Dhinanciisa);
3. Barkadaha;
4. Garaashyada;
5. Dayrarka;
6. Waddooyinka baabuurta;
7. Qolalka yar yar ee wax lagu keydsado;
8. Baarkinka.

GOORMEE U BAAHAN TAHAY QORSHE DHULEED/QARIIRADEED LA XAQIIJIYEEY?

Qorshe dhuleed/qariiradeed la xaqiijiyay ayaa loo baahan yahay marka la buuxinaayo long form application (arjiga foom dheer), arjiga wax ka beddelka qorshayaasha, iyo arjiyada oggolaanshaha Isticmaalka Dhulka (UOP).

XAGEED KA HELI KARTAA QORSHE DHULEED/QARIIRADEED LA XAQIIJIYAY?

1. Waxaad ka heli kartaa milkiilaha dhulka, haddii aad kireysaneyso hanti maguurto ah;
2. Waxaad ka heli kartaa Bangiga Amaahda Dhulka, ama shirkadda dhulka ee aad ka iibsatay dhulka iyo/ama dhismaha;
3. Shaqaaleysii Sahmiye ama Injineer si aad qorshe dhuleed/qariiradeed uga sameeyso warqadaada dhul gadashada.

Fiiro gaar ah: *Haddii qof uu horay ama haddii aad adiga hadda wax ku xireyso ama aad ku dareyso gurigaaga/dhismahaaga ama hantida maguurtada ah ee aan ka muuqan qorshaha dhuleedka hadda, waa inaad la tashataa Injineer diiwaan gashan ama Sahmiye dhuleed si loogu sameeyo isbeddelada loo baahan yahay qorshe dhuleedka la xaqiijiyay ee*

aad hadda haysato.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan wac 617-961-3268 ama iimayl ku dir
ISD@boston.gov

CITY of BOSTON